# Gacmo wadajirbay wax ku gooyaan

**Dugnad. Denne teksten handler om skoledugnad hvor elevene og foresatte deltar. Forfatteren bruker to ordtak på somali: ” tenner bytter sammen” og «en finger vasker ikke ansikt”.**

Waxa la yidhi maamulaha dugsiga mar uu uga mahad celinaayay shaqadii loo dhammaa ee ay waalidiinta iyo ardayduba wada qabteen oo ahayd dayactirka dugsiga. Shirkii ay guddiga waalidiintu qabteen ayaa waxa ka mid ahaa in dugsiga la dayac tiro si bilicdii dugsiga loo soo celiyo.

Maamulka dugsigu waxa uu diyaariyey qalabkii lagu dayac tiri lahaa dugsiga sida:- qalabkii lagu shaqayn lahaa, iyo waxyaabo kaloo la mid ah. Waxashaqadaas ka soo qayb galay oo aan iyana maqnaan qaar ka mid ah hey'adihii dawladda ee degmada. Kuwaasna waxaa ka mid ahaa Wasaaradda Caafimaadka oo keentay shaqaale kaalmeeya dadku haddii ay shaqada ku dhaawacmaan.Waxa kaloo joogay iyana wakaaladda Biyaha, Hawlaha Guud iyo kuwo kaloo badan.

Dadku waxay isku qaybiyeen sida ay xirfaddoodu tahay.

waxaana hawshaas 1oo xilsaaray Muhandis Cabdi Siciid oo ah waalid ay laba calruur ahi u dhigtaan dugsiga una shaqeeya Wasaaradda Hawlaha Guud. Dadka shaqaalaha ah oo ka qayb qaadanaayay hawshaas iskaa wax u qabsada ah shaqooyinkoodii waa laga soo fasaxay iyaga oo loo

xisaabinaayo in ayjoogeen oo kale.

Markii ay shaqadu dhammaatay a)ruu maamulaha dugsigu akhriyey qudbad uu ugu mahad naqaayo dadkii ka soo qayb galay hawshaas muhiimka ah. Waxaanu hadalkiisii ku soo gaba gabeeyay "Far kali ahi fool ma dhaqdo". Wadar iyo waaxid kala roon, ilko wada jir bay wax ku gooyaan.

**LAYLIS:**

**Ka jawaab weydiimahan**

l- Maamulka dugsigu waxa uu mahadcelin u soo jeediyey guddiga waalidiinta. Maxay ahayd arrintuu uga mahad celinaayey?

2- Guddiga waalidiintu goorma ayay go'aansadeen in ay ka qayb qaataan hawshan ku saabsan dayactirka dugsiga?

3- Ayaakamid ahaa hey'adihii kale oo hawshan ka soo qayb galay?

4- Maamulka dugsigu muxuu sii diyaariyey?

5- Ayuu ahaa muhandiska hawsha loo xilsaaray?

6- Dadka shaqaalaha ah oo hawshan iskaa wax u qabsada ah ka soo qayb galay shaqooyinkoodii caadiga ahaa waalaga fasaxay. Maxay tahay sababta looga fasaxay?